

Xeerka 28 Setember 1957, lamba. 33 rep.

Wax ka baddalka Dekereetada 18 Maajo 1956, lamba. 78 “Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya”.

MAAMULAHA

Marka uu garowsaday in loo wareejiyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha iqtisaaska ku xusan arrimaha ku saabsan Madax Dhaqameedyada iyo Nabadoonada, ee faqradda kowaad qod. 86 ee Dekereetada 18 Maajo 1956. lamba. 78; SIDA UU KU SOO TALIYAY Wasiirka Arrimaha Gudaha; LANA DHAGAYSTAY Golaha Wasiirada;

Marka uu tixgaliyay awoodda uu siinayo Xeerka 7 Maajo 1956 lamba. 1.

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA:

Qod. 1

Wasiirka Arrimaha Gudaha waxaa loo soo wareejiyay awoodaha ku saabsan arrimaha Madax Dhaqameedyada iyo Nabadoonada ee ku xusan faqradda kowaad ee qod, 86 Dekereetda 18 Maajo 1956, lamba. 78 “Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya”. Marka uu awooddaas adeegsanayo, Wasiirka Arrimaha Gudaha wuxuu ku soo saarayaa dekereeto, ka dib marka uu ku waafaqo Wasiirka Arrimaha Maaliyadda lana dhagaysto Golaha Wasiirada.

Qod. 2

Dhammaan arrimaha ku saabsan Madax Dhaqameedyada iyo Nabadoonada waxaa nidaaminaya sharci dambe ee la soo saari doono.

Anzilotti

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Xaaji Muuse Boqor

Waa la hubiyay lana diiwaangaliyay – Diw. lamba. 5, bogga 73.

Muqdisho, 28 Setember 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**